



# Orientation to Ontario

## WAAYEELKA

### TUSMO KU AADAN BARNAAMIYADA IYO ADEEGYADA WAAYEELKA

Wasaraada Gobalka ee Arrimaha Waayeelka ayaa soo saaraysa Tusmo ku aadan Barnaamijyada iyo Adeegyada Waayeelka oo ku qoran 16 luuqadood. Ka wac laynka INFOLine [1-888-910-1999](tel:1-888-910-1999) si aad u hesho nuqul. Si aad xog badan uga ogaato taageerooyinka waayeelka, booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/SeniorGuid](http://findlink.at/SeniorGuid)

### GURIYAYNTA

#### Wax ka Badelka Guryaha

Waayeel badan ayaa doonaaya inay gurigooda ku noolaadaan. Dawlada Ontario ayaa bixisa caawimaad dhaqaale si looga caawiyo waayeelka dayactirka guryahooda si ay ugu noolaadaan si madax banaan. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/homeadapt](http://findlink.at/homeadapt)

#### Xaafadaha Duqoowda

Kuwaani waa bulshooyin iskood meel u dagan oo ka kooban dadka hawlgabka ah. Dookhyada guryaha waxaa kamid ah filooyinka, guryaha qolalka badan iyo guryaha yaryar.

Dadka guryaha dagan ayaa dhiiba dhammaan qarashka. Nashaadaadka bulshada iyo nasiinada ayaa laga heli karaa goobta.

#### Guryaha Hawlgabka

Guryaha hawlgabku waa ganacsiyo gaar loo leeyahay oo bixiya guryo deegaan ah, adeegyada taageerada iyo daryeelka gaarka ah ee waayeelka. Guryahaan waxay ruqsad ka haystaan Maamulka Sharciga ah ee Guryaha Hawlgabka

ee Dawlada Ontario (RHRA). Dadka guryaha dagan ayaa dhiiba dhammaan qarashka. Si aad u hesho liiska guryaha hawlgabka ee deegaanka, booqo [rhra.ca](http://rhra.ca)

### DOOKHYADA DARYEELKA

Si aad xog badan uga ogaato dookhyada soo socda ee daryeelka waayeelka, booqo Wasaarada Caafimaadka iyo Daryeelka Mudada dheer [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/senior](http://findlink.at/senior)

- Daryeelka guriga waxaa kamid ah booqashooyinka guryaha ay ku tagaan xirfadleyaal caafimaad sida kalkaalisooyinka iyo dhakhaatiirta dhimirka; daryeelka shaqsigu ah sida caawimaad ku aadan nadaafada; caawimaad ku aadan hagaajinta guriga, ayna ku jiraan cunto karin iyo dhar dhaqaalaha.
- Adeegyada Noloshu La Kaalmeeyo ayaa ka caawiya waayeelka nugul inay kusii noolaadaan guriga ayagoo helaaya isku darta daryeelka mudaysay iyo daryeelka markay u baahdaan ah.
- Barnaamijyada Bulshada waxaa ku jira barnaamijyada la kormeero ee maalintii ee waayeelka, adeegyada cuntada iyo gaadiidka.

Guryaha Daryeelka Muddada Fog waa guryaha dadka waayeelka ah ee u baahan daryeelka kalkaalinta 24 saac ah ama kormeerka. Guryahaan waxaa ruqsad siisay Wasaarada Caafimaadka iyo Daryeelka Mudada Fog. Dadka guryaha dagan ayaa baxsha qarashka guryaha keliya— daryeelka kalkaalinta iyo adeegyada gaarka ah waxaa dhiibaysa qarashkooda dawlada gobalka. Si aad u hesho guriga daryeelka mudada dheer

Funded by / Financé par :

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



ee deegaankaaga, booqo [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/longcare](http://findlink.at/longcare)

OGOOW: Talaabada koowaad ee helitaanka daryeel waa inaad la xariirto Shabakada Isdhexgalka Caafimaadka ee Deegaankaaga (LHIN). Booqo [ccac-ont.ca](http://ccac-ont.ca) ama [healthcareathome.ca](http://healthcareathome.ca)

## GUNNOOYINKA

### Lacagta Kaabista Waayeelka (OAS)

OAS waa lacag bile ah oo la siiyo dadka jira 65 sano ama ka wayn. Si aad ugu qalanto OAS, waa inaad ku noolayd Canada muddo 10 sano ah ama ka badan kadib markii aad gaartay 18 sano jir.

### Kaalmada Dakhliga ee Damaanada leh (GIS)

Haddii aad tahay qof waayeel ah oo danyar ah oo qaata gunnooyinka OAS, waxaad sidoo kale u qalmi kartaa GIS. Xog badan oo ku saabsan OAS iyo GIS ka fiiri ServiceCanada.

Booqo [servicecanada.gc.ca](http://servicecanada.gc.ca) ama [findlink.at/SsFXrD](http://findlink.at/SsFXrD) ama wac [1-800-277-9914](tel:1-800-277-9914).

OGOOW: Waa inaad ka codsataa OAS iyo GIS ServiceCanada - si otomaatig ah uma helayid gunnooyinka.

### Nidaamka Dakhliga Sanadlaha ah ee La damaanad Qaaday (GAINS)

Waxaad si ootomaatig ah ugu qalmi kartaa barnaamijkaan kaalmada dakhliga ee gobalka haddii aad hesho gunnooyinka OAS iyo GIS, dakhliga guud ee aad heshana ka hooseeyo heerka gobalku damaanad qaaday.

Si aad xog badan u hesho booqo barta Wasaarada Dhaqaalaha oo ah [ontario.ca](http://ontario.ca) ama wac [1-866-668-8297](tel:1-866-668-8297).

### Qorshaha Beeshinka ee Canada (CPP)

CPP waxaa heli kara muwaadiniinta hawlgabka ah iyo dadka daganaanshaha rasmiga ah haysta. Shaqaalaha Canada ayaa qoondo qasab ah ku darsada qorshaha ayadoo looga jaro nidaamka canshuurta dakhliga. Waxaad codsan kartaa CPP marka aad hawlgab noqoto.

Cadadka gunnada aad helayso bishii ayaa ku xiran cadadka aad qoondada ku darsatay. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo ServiceCanada [servicecanada.gc.ca](http://servicecanada.gc.ca) ama [findlink.at/ CPP](http://findlink.at/ CPP)

### Barnaamijka Gunnada Daawada ee Ontario

Barnaamijkaan ayaa dhiibaaya qarashka daawooyinka loo qoro dadka reer Ontario ee jira 65 sano ama ka wayn. Xog badan ka ogoow barta [ontario.ca](http://ontario.ca) ama [findlink.at/ ODB](http://findlink.at/ ODB) ama wac [1-866-532-3161](tel:1-866-532-3161).

## XADGUDUBKA IYO BADQABKA WAAYEELKA

Xadgudubka waayeelka waa fal kasta oo waxyeelo ku ah caafimaadka ama faya qabka qofka waxaana ku jiri kara xadgudubka dhaqaalaha, dhimirka, jidhka, ama galmada. Arintaan ayaa ka dhici karta guriga ama banaanka xaafada dhexdeeda.

Haddii adiga ama qof waayeel ah oo aad taqaano loo gaysto xadgudubka waayeelka waa la caawin karaa.

- Laynka Badqabka Waayeelka ayaa baxsha xog, adeeg ku xirid iyo taageero 24 saac maalintii kuna baxsha in ka badan 150 luuqadood. Waxaad sidoo kale soo sheegi kartaa xadgudub. Wac [1-866-299-1011](tel:1-866-299-1011).

## ILAHA MUHIIMKA AH

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo degdeg eh, wac 911 kadibna codso gaariga gurmada degdega ah.

Si aad xog uga hesho barnaamijyada bulshada iyo nasiinada ee waayeelka ee deegaankaaga, wac 211.

Sida uu qabo Xeerak Xuquuqda Aadanaha ee Ontario, laguulama dhaqmi karo si cadaalad daro ah sabab la xariirta da'daada. Xog badan ka ogoow Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario: [ohrc.on.ca](http://ohrc.on.ca)

## OGEYSIIS MUHIIM AH

Danbiileyaasha ayaa badanaa la beegsada waayeelka falalkooda khiyaannada dhaqaalaha. Bari sida loo difaaco naftaada iyo dadka kale adoo booqanaaya Xarunta Kahortaga Tuugada ee Canada: [antifraudcentre.ca](http://antifraudcentre.ca)



## MA OTAHAY?

Si aad ugu qalanto ku dhawaad dhammaan barnaamijyada dawlada, waxaad u baahan tahay inaad soo gudbiso canshuur celinta dakhliga gaarka ah sanad kasta.

